# Waalidiinta Raja sare ka leh Waxbarashada Ilmahooda

## Furaha Horumarka Wada-shaqeynta Qoyska iyo Dugsiga

(Keys to Success in the Family-School Partnership - Somali)

### Waalidka oo shuraaka la noqda Dugsiga

Waalid ahan, waxaad tahat macalinka ugu horeeya ee ugu muhiimsan ee ilmahaada. Marka ilmahaagu bilabaan dugsiga, adiga iyo dugsiga waxaad shuraaka ku noqoneysan rajo wanaag ah kobcinta iyo waxbarashada ilmahaaga. Sanado badan oo baaris waxa lagu ogaaday, hadba inta ay qoyska ka kheyb qataan waxbarashada ilmahooda, iney ku xirantahay hadba wanaagga ilmaha dugsiga iyo nolosha ka garaan. Qoraalkan waxu ku siinaya, baaqyo ah habka aad ku abuuri karto xiriir wanaag iyo waxtar leh.

### Xiriir Wanaag leh

- Is bar macalinka ilmahaaga, maamulaha, iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. Waqtiga ugu wanaagsan inaad bilowdo wa habeenka marxaladda dugsiga la furayo, ama marxaladaha kale ee la qabto marka ardeydu dugsiga ku laabaneyso. Salaan oo gacan qaad, dabadeedna isu sheeg inaad tahay waalidka Cabdi/Caasho; waxaan ku faraxsanahay inaan wada shaqeyneyno sanadkan. Tani waxey abuureysa xiriir wanaag inaad ku bilowdan.
- Wa muhiim inaad garato waqtiga munaasabka ah ee lala hadlo shaqaalaha dugsiga. Inta badan, marka macalimiintu la jogan ardeyda, ma aha in ay daqiiqad ama labo ka badan waqtigooda siyan waalidka. Hadii aad u baahan tahay kulan shaqsiyeed, waqti la balan.
- Hadaad telefon ku wada xiriireysan, la soco macalimiintu waxey fariinta dhageystan waqti go'an. Hadii aad qabto baahi degdeg ah, fariin qoraal ah ha kaa qaado kalkaaliyaha maamulka dugsiga, ee si toos ah ha ugu geyso macalinka.
- Raadi habka ugu wanaagsan ee loola xiriiro shaqaalaha dugsiga. Shaqaalaha qaarkood waxey jecelyihiin in ay telefon ku xiriiran, qaarna email-ka ama qoraal. Hadii ay maqul tahay, akhbaarada muhiimka ah wa inaad qoraal kula xiriirta.
- Hadaad xiriirka email-ka isticmaasho, isku dey inaad qoraal gaaban oo xaqiiqa ah qorto. Hadaad dooneyso inaad qof kala hadasho dareenkaga, si toos ah ama telefone qofka kula hadal.
- La socodsi dugsiga waqtiga iyo habka ugu wanaagsan ee lagugula so xiriiri karo. Hadii raqamka telefonka guriga ama gacanta isbedelo, la soscodsi dugsiga. Si dhaqso leh oo dhameystiran uga so jawab hadu qof kula so xiriiro.
- Shandadda bugaagta ilmahaaga, ka eeg maalin walba waxi akhbaara ah ama jariidadda dugsiga.
- Baro isticmaalka khadka combiyutarka ee ee dugsiga, ee si joogta ah u eeg.
- Hadu Englishku lukhadda aheyn, codso in lukhadaada akhbaarada dugsiga lagugu turjumo.

### Wada-xiriir ixtiraam leh

- Sida ixtiraamka leh oo aad jeclaan laheyd in lagugula mucaamiltamo, ula dhaqan dadka kale.

- Si wanaag leh ugala hadal ilmahaaga dugsiga iyo macalimiinta, wey kugu deyanayan, taasina waxey sameeyn wanaagsan ku yeelaneysa waxbarashadooda.
- Markaad macalimiinta kala hadleyso ilmahaaga baahidooda ama wawalka aad qabto, isku dey inaad ixtiraamto baahida ardeyda kale ee kala duwan ee ilmahaaga wax la barata.
- Balanka aad qaado oofi. Diwaan ku qoro maalmaha kulanadda dugsiga, ee si joogto ah u eeg. Hadaad awoodin inaad kulanka tagto, horey ula xiriir oo waqti kale balan qabso.

**Ka kheyb-qaadasho wax tar leh**

- Isku dey inaad hesho waqti, oo aad si iska wax-uqabso ah uga qeyb qaadato maclumaadka dugsiga ee fasalka ilmahaaga, ama jaaliyadda, adigo ku deeqaya habda waxaad jeceshahay ama ku wanaagsantahay inaad qabato. Mitalan hadaad jeceshahay inaad sawiro qaado, ku deeq waqti marxaladaha digsiga, oo aad sawiro ka qaado ilmaha. Tani waxey ilmahaaga tuseysa qiimaha aad u heyso dugsiga, waxeyna iyaga u tahay tusaalo wanaagsan.
- Hadii waqtiga shaqada ku masamaxeyn in aad waqti dugsiga uga qaadato, ka codso dugsiga in aad hab kale oo howl aad guriga ku qaban karto, dabadeedna ilmaha ugu sii dhiibi karto ugu deeqdo, sida waraaqaha magaca lagu qoro isku hagaajintoda.
- Khadari in aad ka mid noqoto gudiyada waalidka ee dugsiga la taliya, ama fikrad bixinta siiya, ama gudiyada kale ee la taliya degmada dugsiga.
- La socodsi marka shaqaalaha dugsiga howl wanaagsan qabanayan. Waraaq yar oo ah kuwa ay ardeydu u qoraan macalimiinta aya dhiira gelin u noqon kara macalinka, kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga ama shaqaale walba ee dugsiga.

**Dibaato-xalin wanaag leh**

- Marka qalad dhaco, isku dey inaad xaliso si degdeg ah oo dhameystiran, dabadeedna horey uga soco. Mowqifku wa waxbarasho guul leh ilmahaagu iney garaan.
- Isku dey inaad bilowga sanad dugsiyeed walba u aragto fursad cusub, oo laga tagay waxii sanadki hore dhacay.
- Waxaad khabiir ku tahay ilmahaaga, macalin walbana waxuu tacliin iyo khibrad u leeyahay waxa ay baraan. Labada dhinacba waxaad kala fa'ideysan kartan habka ilmahaaga looga qancin laha baahida wax-barasho iyo kobcidda.
- Wa muhiim in waalidku fahman xuquuqahooda sharciyeed, masuuliyadda saran iyo habka nidaamku u shaqeeyo. Weydiiso oo akhri buugga waalidka ee degmada dugsiga.
- Raadi habka masuuliyadda xilalka shaqaalaha dugsiga, oo walwalka ama su'aalaha aad qabto, la raadso qofka ay munaasabka ku tahay xilkaa.
- Hadii qof shaqaalaha dugsiga ka mid ah khilaaf idinka dhaxeeyo, oo aad si toos ah u wada xalion weysan khilaafka idin dhex yaal, weydiiso inad la hadasho qofka iyaga sida tooska ah uga sareeya.
- Isku dey inaad arin ku khilaafi karto, adoon noqon qof aan macquul aheyn. Kala saar qofka shaqsiyadiisa iyo dhibaatada taagan. Khilaafku haku ekaado dadka waaweyn oo ha ku lifaaqin ilmaha; inta badan waxa dhici karta adiga iyo ilmaha inaad xiriir la si lahataan dugsiga xita khilaafka marku dhamaado kadib.
- Markad xanaaqsan tahay ama aad dareemeyso in aad ku wareertay arin, isku dey inaad su'aalo weydiso, ee xanaaqu yu ku qaadin. Isku dey inaad shaqaalaha dugsiga weydiiso iney kuugu fasiran kelmado ama hab aad fahmi karto.
- Ha isku xaxluujin dhibaatada, isku taxluuji natiijyada suura gal noqon karta.
- Marka khilaafka idinka dhexeeya ku saabsan yahay hab loo xalin laha arin walwal ka taagan tahay, isku dey qof maskax furan u leh hab cusub inaad noqoto, oo aad tijaabiso. Hubi inu jiro qorsho lagu ogaanayo oo la isgu soo aruurinayo akhbaarada muujinaya in habka cusub shaqeynayo.

Inkasto wada jir u shaqeyntu wax adag noqon karta, lakin waxey noqon karta mid wax qabad leh. Wada shaqeynta dugsiga iyo waalidka waxa lagu gaari kara yoolka la doonaya oo ah in ilmahu guul ka garaan waxbarashada iyo nolosha.

## Su'aalo

Su'aal miyaad ka qabta la shaqeynta dugsiga ilmahaaga? Waxaad soo wici karta Hassan Samantar ee xarunta PACER Center (952) 838-1334, oo waxad codsan karta in uu kala shaqeeyo mashruuca waalidiinta rajada sare ka leh ilmahooda.

*Heya'dda PACER wa hey'ad Faa'iido aan u shaqeyn (nonprofit) ee gobolka Minnesota. Waxey saacidaa xuquuqaha waxbarashada caruurta dib u-dhaca leh iyo kuwa aan laheyn. Waxey bixisa tababaro, cawinaad shaqsiyeed, akhbaaro qoraal ah iyo wax sii dheer.*